Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tixraac: XRW/0526/12/2025 Taariikh: 04/12/2025

Ku: Wasaaradda Deegaanka iyo Isbaddelka Cimilada Muqdisho
Og: Dhammaan Golaha Wasiirrada Muqdisho
Og: Guddoonka Golaha Shacabka JFS Muqdisho
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Muqdisho

XW - BIXIT 04 DEC 2025 OPM - EXIT

**UJEEDDO: ANSIXINTA "HINDISE-SHARCIYEEDKA SHARCIGA DHISMAHA HAY'ADDA QARAN EE MAAREYNTA DEEGAANKA".**

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka $97^{aad}$ faqradaha $1^{aad}$ iyo $2^{aad}$; Qodobka $99^{aad}$ farqadaha (a), (b) iyo (c); iyo Qodobka $100^{aad}$ farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Warqadda summaddeedu tahay **WD&IC/XW/0381/2025** ee ku taariikheysan **01/12/2025** ee Wasaaradda Deegaanka iyo Isbaddelka Cimilada kuna saabsan codsiga soojeedinta"**Hindise-Sharciyeedka Sharciga Dhismaha Hay'adda Qaran ee Maareynta Deegaanka**";

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.35.138.12.25** ee **04/12/2025,** kuna saabsan **Ansixinta "Hindise-Sharciyeedka Sharciga Dhismaha Hay'adda Qaran ee Maareynta Deegaanka"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgeliyay:** Muhiimadda uu u leeyahay ilaalinta, daryeelka iyo maareynta kheyraadka dabiiciga ah ee Dalka.

**Wuxuu Meelmariyay:**

**Qodobka 1aad:**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.35.138.12.25** ee **04/12/2025,** kuna saabsan **Ansixinta "Hindise-Sharciyeedka Sharciga Dhismaha Hay'adda Qaran ee Maareynta Deegaanka"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Qodobka 2aad:**

**Farid**

In si degdeg ah loogu gudbiyo Golaha Shacabka "**Hindise-Sharciyeedka Sharciga Dhismaha Hay'adda Qaran ee Maareynta Deegaanka**"si ay uga gutaan waajibaadkooda Dastuuriga ah.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA ★ XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA ★ OFFICE OF THE PRIME MINISTER ★ FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

**Tix: WD&IC/XW/O381/2025** **Date: 01/12/2025**

**Ku: Agaasinka Golaha Wasiirada**

**UJEEDO: U GUDBIN GOLAHA WASIIRADA "HINDISE-SHARCIYEEDKA DHISMAHA HAY'ADDA QARAN EE MAAREYNTA DEEGAANKA"**

Wasaaradda Deegaanka iyo Isbedelka Cimilada waxa ay soo gudbineysaa Hindise sharciyeedka Dhismaha Hay'ada Qaran ee Maareynta Deegaanka,sharcigan oo soo maray dhamaan habraacyada loogu tala galay kana soo gudbay hubinta iyo talo bixnta Wasaaradda Cadaaladda iyo Arimaha Dastuurka & Xafiiska Garyaqaanka guud ee Dowladda.

Sidaas darteed, waxa aan codsaneynaa in loo qeybiyo Golaha wasiirada si loo meel marsho sharcigan.

Waxaa warqadan la socda nuqulka Hindise sharciyeedka iyo warqadaha kasoo baxay Wasaaradda Cadaaladda iyo Arimaha Dastuurka , & Garyaqaanka Guud ee Dowladda.

Qadarin badan,

**Sareeye Guud. Bashir Mohamed Jama,**
**Wasiirka, Wasaaradda Deegaanka & Isbeddelka Cimilada**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA DEEGAANKA & ISBEDDELKA CIMILADA
MINISTRY OF ENVIRONMENT & CLIMATE CHANGE
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

**Summad: XGG/416/2025** **29/11/2025**

**Ku: Agaasinka Golaha Wasiirradda** **Muqdisho**
**Ku: Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada** **Muqdisho**
**Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS** **Muqdisho**

**Ujeeddo:** Talo Sharci

Xafiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo tiixraacaya warqadda Summaddeedu tahay: **WCAD/XAWSHH/2668/2025** ee ku taarikheysan **26/11/2025** kana soo baxday Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, Ujeedadeeduna ahayd: **Soo gudbin "Hindse-sharciyeedka Dhismaha Hay'ada Qaran ee Maareynta Deegaanka"**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, asaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si Waafaqsan Sharci **Lr. 18 ee 29 Jannaayo 1976**, ayaa waxa uu halkaan idin kugu soo gudbinayaa Hindse-sharciyeedka sare ku xusan oo ay Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka horay ugu soo gudbisay, si uu uga guto waajibaadkiisa shaqo, ugana bixiyo Talo Sharci.

Haddaba, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda kadib markii uu darsay Nuqulka Hindse-sharciyeedkan oo lagu dhisaayo Hay'ada Qaran ee Maareynta Deegaanka, kuna ku daray ra'yigiisa iyo taladiisa Sharci, intaas kadib Xafiisku waxa uu ku talinayaa in Hindse-sharciyeedkan loo gudbiyo Golaha Wasiirada, maadaama aanu kahor imaanayn Dastuurka iyo Shuruucda dalka.

Ugu dambeyn Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda waxa uu ku wargalinaya Wasiirka Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada iyo Agaasimaha Golaha Wasiiradda in nuqulka ku lifaaqana waraaqadani uu yahay midka saxda.

**Wabillaahi Towfiiq**

**FG: Halkan waxa ku lifaaqan Hindse-sharciyeedka Sare ku soo sheegnay.**

**Avv. Aadan Dacar Maadey**
**Ku-Xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL مكتب المحامي العام للدولة

**SUMMAD: WCAD/XAWSHH/2668/2025** **Tr. 26/11/2025**

Mudane Garyaqaan,

**UJEEDDO: SOO-GUDBIN "HINDISE-SHARCIYEEDKA DHISMAHA HAY'ADDA QARAN EE MAAREYNTA DEEGAANKA"**

Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, waxa ay halkan ku soo gudbinaysaa "Hindise-sharciyeedka Dhismaha Hay'adda Qaran ee Maareynta Deegaanka" oo abuuraya hannaan sharci iyo mid maamul oo lagu nidaamiynayo dhismaha hay'adda.

Hindise-sharciyeedkan oo ay diyaarisay Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada ee Xukuumadda JFS, waxay Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurku ka gudatay waajibaadkeeda sharci ee ku aaddan hindise-sharciyeedyada.

Haddaba, waxaan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka codsanaynaa in uu ka guto waajibkiisa sharci ee ku aaddan hindise-sharciyeedyada si habraaca ansixintu u dhammeystirmo.

Wada-shaqeyn wacan.

Mudane. Xasan Axmed Cali
**AGAASIMAHA WAAXDA SHARCIYADA IYO HESHIISYADA,**
**WASAARADDA CADAALADDA IYO ARRIMAHA DASTUURKA**

Garyaqaanka Guud ee Dawladda =Muqdisho=
Og: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
GALID
Taariikh: 26/11/2025

Dr. Dacar
26/11/2025

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## WASAARADDA DEEGAANKA IYO ISBEDDELKA CIMILADA

# HINDISE-SHARCIYEEDKA SHARCIGA DHISMAHA HAY'ADDA QARAN EE MAAREYNTA DEEGAANKA

# TUSMO


**Qodobka 1aad Magaca Sharciga** ........ 1

**Qodobka 2aad Qeexid** ........ 1

**Qodobka 3aad Dhismaha Hay`adda** ........ 2

**Qodobka 4aad Ujeeddooyinka Hay'adda** ........ 2

**Qodobka 5aad Mabaadi'da Hageysa hay'adda** ........ 3

**Qodobka 6aad Hawlaha iyo Awoodaha Hay'adda** ........ 3

**Qodobka 7aad Qaab-dhismeedka Hay'adda** ........ 5

**Qodobka 8aad Guddiga Sare ee Hay'adda** ........ 5

**Qodobka 9aad Xubnaha Guddiga Sare** ........ 5

**Qodobka 10aad Awoodaha iyo Shaqooyinka Guddiga Sare** ........ 6

**Qodobka 11aad Shuruudaha Xubinimada Guddiga Sare** ........ 6

**Qodobka 12aad Xil Ka-qaadista Xubin ka mid ah Guddiga Sare** ........ 6

**Qodobka 13aad Banneynta Xubinnimada Guddiga Sare iyo Buuxinta Xilkaas** ........ 7

**Qodoka 14aad Go'aannada iyo Shirarka Guddiga** ........ 7

**Qodoka 15aad Mushaaraadka iyo Gunnooyinka Xubnaha Guddiga** ........ 8

**Qodoka 16aad Xeer-hoosaadyada Guddiga** ........ 8

**Qodoka 17aad Magcaabista Maareeyaha Guud iyo Ku-xigeenka Hay'ada** ........ 9

**Qodoka 18aad Shaqooyinka Maareeyaha Guud ee Hay'adda** ........ 10

**Qodobka 19aad Dhaqaalaha iyo Xisaabaadka Hay'ada** ........ 10

**Qodobka 20aad Shaqaalaha Hay'ada** ........ 10

**Qodobka 21aad Soo-saarid Xeer-nidaamiye** ........ 11

**Qodobka 22aad Baabi'in** ........ 11

**Qodobka 23aad Dhaqan-gal** ........ 11

## Qodobka 1aad
## Magaca Sharciga

Sharcigani waxaa lagu magacaabaa "Sharciga Dhismaha Hay'adda Qaran ee Maareynta Deegaanka".

## Qodobka 2aad
## Qeexid

Sharcigani haddii uusan macne kale tilmaamin, ereyada soo socda waxa ay yeelanayaan micnaha ku hor qoran:

1. '**Bi'iye ayaa Bixiya':** Waxaa loola jeedaa qofka dhibka geysta ayaa bixinaya wixii kharashaad ama magdhaw ah sida ku xusan Qodobka 5aad faqradiisa (4).
2. **'Hay'ad'**: Waxaa loola jeedaa Hay'adda Qaran ee Maareynta Deegaanka (NEMA) ee lagu dhisay Qodobka 3aad ee Sharcigan.
3. **'Guddiga Sare'**: Waxaa loola jeedaa Guddiga Sare ee Hayadda ee lagu dhisay Qodobka 8aad ee Sharcigan.
4. **'Mabda'a Taxadarka'**: Waxaa loola jeedaa mabda' dhigaya in laga hortago waxyeelaynta deegaanka inta aanay dhicin sida ku xusan Qodobka 4aad faqradiisa (3).
5. **'Maareeyaha Guud'**: Waxaa loola jeedaa Maareeyha Guud ee Hay'adda ee lagu magacaabay si waafaqsan Qodobka 17ad ee Sharcigan.
6. **'Maareeye Ku-xigeen'**: Waxaa loola jeedaa Maareeye Ku-xigeenka Hay'adda ee lagu magacaabay si waafaqsan Qodobka 17aad ee Sharcigan.
7. **'Sharciga Ilaalinta iyo Maareynta Deegaanka'**: Waxaa loola jeedaa Sharciga Ilaalinta iyo Maareynta Deegaanka JFS ee la ansixiyay 2024.
8. **'Wasaarad'**: Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada ee Xukuumadda JFS.
9. **'Wasiir/ka'**: Waxaa loola jeedaa Wasiirka Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada ee Xukuumadda JFS
10. **'Xeer-nidaamiyaha Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada'**: Waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiyaha Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada ee JFS kaasi oo la ansixiyay 2024.

## Qodobka 3aad
## Dhismaha Hay`adda

1. Waxaa Sharcigan lagu dhisay Hay'ad Dawladeed oo lagu magacaabo "Hay`adda Qaran ee Maareynta Deegaanka" oo marka magaca la soo gaabiyo noqonaya (NEMA) oo u taagan ( National Environmental Management Authority).
2. Xarunta Hay'addu waa Caasimadda Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya ee Muqdisho, waxay hay'addu xafiisyo ku yeelanaysaa Dawlad-goboleeedyada Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka, waxayna si dhaw ula shaqaynaysaa Wasaaradaha ama Hay'adaha deegaanka iyo isbeddelka cimilada ee dhammaan Dawlad-goboleedyada dalka iyo Gobolka Banaadir.
3. Hay'addu waxay u madax-banaan tahay gudashada xilkeeda, waxayna leedahay shakhsiyad sharciyeed oo u gaar ah oo ay ku dacwoon karto laguna dacweeyn karo, heshiisyana ay ku geli karto.
4. Hay'addu waxay siyaasad ahaan hoos imaanaysaa Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada, oo ku leh kor-joogtayn, toosin, tilmaan iyo in laga siiyo warbixinno joogta ah, lana xiriira hawlaha Hay'adda Maareeynta Deegaanka.
5. Hay'addu waxa ay ku shaqaynaysaa oo ay fulinaysaa siyaasadda guud ee ku aadan ilaalinta iyo maareynta deegaanka ee ay dejiso Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada JFS.

## Qodobka 4aad
## Ujeeddooyinka Hay'adda

1. Fulinta iyo hirgelinta siyaasadda guud iyo shuruucda, ilaalinta iyo maareynta deegaanka dalka;
2. Fulinta iyo hirgelinta sharciga, ilaalinta iyo maareynta deegaanka, Xeer-nidaamiyaha Qiimeynta Saameynta Deegaanka, Bulshada iyo dhamaan Xeer-nidaamiyahaasha ka farcama Sharciga Ilaalinta iyo Maareynta Deegaanka.
3. Ilaalinta, daryeelka iyo maareynta deegaanka iyo kheyraadka dabiiciga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya kuwaas oo laga faa'idaysanayo iyadoo la raacayo nidaamka horumarka waara;

## Qodobka 5aad
## Mabaadi'da Hageysa hay'adda

Hay'addu markay fulineyso siyaasadda iyo shuruucda ku aaddan maareynta iyo ilaalinta deegaanka ee heer qaran, waxay tixgelinaysaa mabaadi'da hoos ku qoran:

1. Qof kasta oo ku sugan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu xaq u leeyahay in uu helo deegaan nadiif ah oo caafimaad qaba, isla markaana waxaa saaran waajibaad ah inuu ilaaliyo oo horumariyo deegaanka;
2. Kheyraadka dabiiciga ah waa in looga faa'idaystaa qaab joogteysan/waara, jiilka hadda joogana waa ina ay baahiyahooda uga haqab-baxaan iyagoon ku xadgudbeyn baahiyaha jiilalka dambe si ay iyaguna u daboolaan (uga haqab baxaan) baahidooda;
3. Waxaa la doorbidayaa in laga hortago waxyeelleynta deegaanka inta aanay dhicin, taasina waxa ay ka wanaagsan tahay iskuday kasta oo lagu soo celinayo deegaan burburay ama waxyeello soo gaartay. Haddii ay jiraan halis ama khatar la hubo in ay ku soo fool leedahay deegaanka waxyeelo culusna gaarsiin karta deegaanka, la'aanta caddeyn cilmiyeed (scientific evidence) oo buuxda sabab loogama dhigi karo in dib loo dhigo tallaabooyinka looga hortago waxyeelleynta deegaanka (Precautionary Principle);
4. Kharashka nadiifinta deegaanka waxyeeladu ka soo gaartay wasakheynta, magdhowga dhibbane, khasaaraha ka dhasha ficilkaas, iyo kharashyada kale ee ka dhasha dhibaato soo gaartay deegaanka, waxaa bixinaya bi'iyaha (qofka dhibaatada sababay). Bi'iyuhu waa qofka ficilladiisu horseedaan (sababaan) ama horseedi karaan waxyeelo soo gaartay deegaanka ama dadka (Pollutor Pay Principle);
5. Maareynta iyo ilaalinta deegaanku si ay u noqoto mid meel mar ah, waa in arrimaha deegaanka laga qeyb geliyo bulshada qeybaheeda kala duwan.

## Qodobka 6aad
## Hawlaha iyo Awoodaha Hay'adda

Hay'addu, iyada oo fulinaysa kuna dhaqmeysa siyaasadda guud iyo shuruucda ku aaddan arrimaha ilaalinta iyo maareynta deegaanka ee dalka, waxay si gaar ah ugu xilsaaran tahay:

1. Bixinta rukhsadaha iyo shatiyada deegaannada dalka oo dhan.
2. La-socodka iyo hubinta tayada guud ee deegaanka iyo u hoggaansanaanta shuruucda ilaalinta deegaanka ee dhammaan waaxyaha kala duwan.

3. Hirgelinta iyo fulinta shuruucda, siyaasadaha, iyo xeerarka ku aaddan ilaalinta iyo maareynta deegaanka.
4. Dejinta, sameynta, hirgelinta iyo maamulka nidaamka Qiimaynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada.
5. Kormeerka iyo la-socodka tayada guud ahaan deegaanka sida: hawada, biyaha, carrada, kala duwanaanta noolaha, iyo heerarka muhiimka ah ee deegaanka.
6. Horumarinta, ururinta, faafinta iyo keydinta macluumaadka iyo xogaha deegaanka.
7. Fulinta cilmi-baarisyo ku aaddan ilaalinta iyo maareynta deegaanka.
8. Dhiirrigelinta waxbarashada deegaanka, kor u qaadidda wacyiga dadweynaha ee arrimaha deegaanka, qabashada ololayaal wacyigelineed, iyo ka qeybgelinta iyo daneeyayaasha arrimaha ilaalinta iyo maareynta deegaanka.
9. La-shaqeynta Hay'adaha Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada ee heer federaal iyo heer dawlad-goboleed, wasaaradaha iyo hay'adaha heer federaal ee arrimaha deegaanku ay khuseyso, si loo hirgeliyo siyaasadaha iyo xeerarka deegaanka.
10. Taageeridda Hay'adaha ee ku aaddan kobcinta awooddooda u hoggaansanaanta iyo fulinta xeerarka deegaanka;
11. Fulinta barnaamijyada iyo mashaariicda ku aaddan ilaalinta iyo maareynta deegaanka;
12. Si ay u fuliso waajibaadkeeda, Hay'addu waxa ay geli kartaa goob kasta oo lagu tuhmo in ay ka socoto dhibaateyn deegaanka isla markaana Hay'addu waxay dalban kartaa xog, diiwaan ama warbixin, waxayna qaadan kartaa muunado ay tijaabiso, kadib marka ay ogolaansho ka hesho maxkamadda awooda u leh.
13. Hay'addu waxa ay soo saari kartaa tilmaamo ku aaddan ilaalinta deegaanka, waxayna soo rogi kartaa ganaaxyo si waafaqsan shuruucda ilaalinta iyo maareynta deegaanka;
14. Shatiyada iyo ruqsadaha deegaanka ee ay Hay'addu bixiso way la noqon kartaa haddii la jabiyo shuruudaha shatiga ama ruqsadda;
15. Hay'addu waxay qabanaysaa hawlaha kale ee lagama maarmaanka u ah fulinta waajibaadkeeda si waafaqsan sharcigan iyo shuruucda kale ee ilaalinta iyo maareynta deegaanka.
16. Hay'addu waxay soo saartaa Habraacyo lagu hormarinayo deegaanka iyadoo isla markaan horseeda funlintooda iyo meelmarintooda.

**Qodobka 7aad**
**Qaab-dhismeedka Hay'adda**

1. Hay'addu si ay hawlaheeda u fuliso, waxay yeelanaysaa qaab-dhismeedka soo socda:
   a) Guddiga sare ee Hay'adda
   b) Maareeyaha Hay'adda;
   c) Maareeye ku xigeen;
   d) Agaasimayaal iyo hawlwadeenno kale ee Hay'adda.
2. Hay'addu waxay yeelan kartaa guddiyo qabta hawlo gaar ah si waafaqsan Sharciga Ilaalinta iyo Maareynta Deegaanka, Xeer-nidaamiyaha Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada iyo shuruucda kale ee ilaalinta iyo maareynta kheyraadka deegaanka.

**Qodobka 8aad**
**Guddiga Sare ee Hay'adda**

Waxaa la asaasayaa Guddiga Sare ee Hay'adda, kaas oo masuul ka ah arrimaha la-socodka, kor-joogteynta iyo ka talo-bixinta shaqooyinka ay qabanayso Hay'addu.

**Qodobka 9aad**
**Xubnaha Guddiga Sare**

1. Guddiga Sare ee Hay'addu wuxuu ka kooban yahay toban iyo kow (11) xubnood oo uu ka mid yahay Maareeyaha Guud iyo Maareeye Ku-xigeenka Hay'adda.
   a) Xubnaha intooda kale waxaa lagu soo xulayaa aqoontooda iyo qibraddooda shaqo iyadoo lagu soo xulayo tartan furan.;
   b) Habraaca lagu soo xulayo Guddiga waxaa lagu soo saarayaa Xeer-nidaamiye uu soo saaro Wasiirku;
2. Marka la soo dhammeystiro xubnaha, Wasiirka ayaa u soo gudbinaya liiska Xubnaha Guddiga Golaha Wasiiradda si ay u ansixiyaan, Raisul Wasaaraha ayaana liiska xubnaha la ansixiyay ku soo saaraya Xeer Ra'iisul Wasaare.
3. Xubnaha Guddigu kulankooda ugu horreeya ayey ku dooranayaan Guddoomiye iyo Gudoomiye ku-xigeen ay iska dhex dooranayaan xubnaha Guddigu, Maareeyaha Hay'adda ayaana noqonaya Xoghayaha Guddiga.
4. Gudoomiye Ku-xigeenka ku xusan faqradda (3) ee Qodobkan, wuxuu qabanayaa shaqada gudoomiyaha waqtiyada uu maqan yahay ama markuu awoodi waayo gudashada shaqadiisa ama uu isagu u wakiisho qabashada hawlahaas.

## Qodobka 10$^{aad}$

## Awoodaha iyo Shaqooyinka Guddiga Sare

1. Awoodaha iyo shaqooyinka Guddiga Sare waxay noqonayaan:
   a) Kor-joogtaynta iyo la-socoshada qaabka ay hay'addu u shaqaneyso;
   b) La-socoshada si joogta ah shaqada hay'adda iyo heerarka shaqaalaha;
   c) La-tashi qorsha-hawleedka hay'adda, barnaamijyada shaqo ee sanadlaha ah iyo miisaaniyaddiisa, kuwaas oo ay tahay in uu diyaariyo Xafiiska Maareeyaha Guud ee Hay'adda;
2. Guddigu wuxuu talo ka bixinayaa hawlaha Hay'adda, si loo horumariyo hufnaanta iyo hannaanka shaqo ee Hay'adda oo ay ku jirto qaab-dhismeedka Haya'ddu;
3. Guddigu wuxuu sidoo kale talo ka bixinayaa hawlaha la xiriira ilaalinta iyo maareynta deegaanka.

## Qodobka 11$^{aad}$

## Shuruudaha Xubinimada Guddiga Sare

Qofka loo magacaabayo xubin ka noqoshada Guddiga waa in uu:

1. Yahay Soomaali;
2. Da'diisu ka yareyn sodon (30) sano;
3. Haysto Shahaado heer jaamacadeed iyo khibrad shaqo oo aan ka yareyn 3 sano ee cilmiga deegaanka, isbeddeleka cimilada, dhaqaalaha, sharciga, arrimaha bulshada iyo arrimaha la xiriira;
4. Gelin fal-dembiyeed maxkamadi ay si kama damays ah ugu ku xukuntay oo ka reebaya qabashada hawl guud.

## Qodobka 12$^{aad}$

## Xil Ka-qaadista Xubin ka mid ah Guddiga Sare

1. Marka uu Wasiirku soo jeediyo Golaha Wasiirraduna ay ogalaadaan, Ra'iisal Wasaaraha Xukuumadda JFS wuxuu xil-ka-qaadis ku sameynayaa xubin Guddiga Sare ka mid ah, waa haddii Wasiirku caddeeyo Ra'iisal Wasaaruhuna ku qanco in shaqsiga xubinta ka ah:
   a) Xilkiisa u gudan waayay xanuun jirka ama maskaxda ah dartiis;
   b) Galay fal dambi ah, kaas oo ay maxkamadi si kama dambays ah ugu xukuntay kana reebtay qabashada hawl guud;
   c) U gudan waayey si waafaqsan Sharcigan hawshiisii xubinimada Guddiga.

2. Wasiirku wuxuu bixinayaa talada ku-xusan faqradda (1) ee Qodobkan, ka dib marka xubinta Guddiga ee xilka laga qaadayo la siiyo fursad lagu dhageysto difaaciisa.

**Qodobka 13aad**
**Banneynta Xubinnimada Guddiga Sare iyo Buuxinta Xilkaas**

1. Xilka xubinta Guddiga waxay noqonaysaa mid bannaan haddii xubintu:
    a) Ay tahay mid aan buuxin shuruudda ku xusan Qodobka 11aad ee Sharcigan;
    b) Is-casilaad qoraal ah ay u gudbisay Wasiirka uuna ka aqbalo;
    c) Ka maqnaato saddex kulan oo isku xigta, iyadoo aan ku maqneyn fasax uu ogyahay Gudoomiyaha Guddigu;
    d) Laga qaado xilka, sida ku xusan Qodobka 12aad ee Sharcigan;
    e) Ay Geeriyooto.
2. Haddii xubin Guddiga Sare ka mid ah ay banneyso xilka sida ku cad faqradda (1) ee Qodobkan, xilkaas waa in la buuxiyaa oo loo magacaabaa qofka ku habboon iyada oo la raacayo si waafaqsan Qodobka 10aad ee Sharcigan.

**Qodoka 14aad**
**Go'aannada iyo Shirarka Guddiga**

1. Wasiirka waa in uu isugu yeeraa shirka ugu horreeyo ee Guddiga Sare iyo kuwa aanan caadiga ahayn, iyada oo la tixgelinayo faqradda (3) ee Qodobkan.
2. Shirarka Guddiga waa in lagu qabtaa waqtiyada iyo meelaha loogu talo galay oo Guddigu go'aamiyo, ugu yaraan waa in ay afar (4) jeer sanadkii qabsadaan shirarkooda.
3. Guddoomiyaha Guddiga Sare wuxuu isugu yeeri karaa Guddiga Sare shir gaar ah ama aan caadi ahayn marka loo baahdo;
4. Kooramka shirarka Guddiga Sare wuxuu ku qabsoomayaa marka ay joogaan kala bar ka badan xubnaha Guddiga Sare (50%+1).
5. Guddoomiyaha Guddiga Sare ayaa shir-guddoominaya kulamada Guddiga sare, Guddoomiyuhu haddii uusan joogin waxaa shir-guddoominaya Guddoomiye ku-xigeenka, hadii labadoodu maqan yihiin Xubnaha Guddiga Sare ayaa iska dhex dooranaya shir-guddoomiye.
6. Go'aanka ay isku raacaan kala bar ka badan xubnaha Guddiga Sare ee shirka jooga ayaa ah go'aanka Guddiga, haddii ay dhacdo inay is le'ekaadaan codadka tirada xubnaha Guddiga; shir-guddoonka dhinaca uu u codeeyo ayaa ansax ah.

7. Go'aan ay gaareen Xubnaha Guddiga Sare ama shaqo kasta oo ay qabteen waxay wax kama jiraan noqan kartaa haddii;
    a) Uusan Guddiga Sare u dhameystirneyn tiradii loo baahnaaa ee kulanku ku qabsoomi lahaa;
    b) Kulanka Guddiga Sare uu ku jiro qof aan ka tirsaneyn Guddiga, xataa haddii la gaaray go'aan la isku raacay waqtigaas isaga ah ama go'aanka la gaaray ay oggalaadeen aqlabiyadda xubnaha Guddiga ee goob joogga ah marka codka la qaaday.
8. Iyada oo la eegayo sharcigan, Guddigu waxay nidaamin karaan habka shaqada Guddigu u socoto taas oo ay waajib tahay in Guddigu ku dhaqmaan marka ay shirayaan.
9. Guddigu waa inay si wanaagsan u diyaariyaan hadal-qoraalka shirkooda, iyaga oo adeegsanaya Xog-hayaha Guddiga.
10. Guddiga Sare waxay ku marti-qaadi karaan shirarka Guddiga inuu ka qeyb galo qof walba oo ay u arkaan in fikirkiisu muhiim u yahay shirka, balse qofkaasi xaq uma laha inuu cod ka dhiibto shirka.
11. Iyadoo la tixgelinayo faqrada (9) ee Qodobkan, wax go'aan ah oo aan qoraal ahayn lagama soo saari karo shirka Guddiga, balse waxaa suuragal ah in xubnaha Guddigu go'aan ka gaaraan hawlo kale oo ay saxiixeen xubnaha Guddiga Sare iyaga oo ku sugan gudaha Soomaaliya kooramkuna uu buuxo, wuxuu noqonayaa go'aankaasi;
    a) mid saameyntiisa leh haddii uu ka soo baxay kulan xubnaha Guddigu isugu yimaadeen oo si sax u ah qabsoomay;
    b) in la diiwaangeliyo, si loogu ansixiyo shirarka soo socda ee Guddiga.

## Qodoka 15aad
## Mushaaraadka iyo Gunnooyinka Xubnaha Guddiga

Wasiirka ayaa Xeer-nidaamiye ku soo saaraya gunnooyinka ay muteysanayaan xubnaha Guddiga Sare iyada oo la raacayo miisaaniyadda Hay'adda, isaga oo raacaya Sharciga Shaqaalaha Rayidka.

## Qodoka 16aad
## Xeer-hoosaadyada Guddiga

Guddigu wuxuu sameysanayaa xeer-hoosaadyo la xirriira:

a) Qaabka la iskugu dubbarido qabashada shirarka Guddiga, hannaanka shirarka, kooramka iyo qaabka loo diyaarinayo ajendayaasha shirka iyo waxa ka soo baxaya;

b) Guud ahaan, wax kasta oo Guddigu u arko in uu muhiim u yahay shaqaaleysiinta shaqaalaha ay Hay'addu u baahantahay; ama in laga miradhalin karo si loo gaaro ujeeddooyinka sharcigan.

## Qodoka 17aad
## Magcaabista Maareeyaha Guud iyo Ku-xigeenka Hay'ada

1. Mareeyaha Guud ee Hay'adda iyo ku-xigeenkiisa waxaa soo jeedinaya Wasiirka Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada, waxaana meel-marinaya Golaha Wasiiradda, kadibna waxaa Xeer Madaxwayne ku soo magcaabaya Madaxwaynaha JFS sida ku xusan Qodobka 90aad Xarafkiisa (k) iyo Qodobka 99aad ee Dastuurka, islamarkaana waxaa lagu soo saaraya Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.
2. Qofka loo magacaabayo Maareeyaha Guud waa in uu yahay;
   a) Qof Soomaali ah
   b) Qof aan Maxkamad ku xukumin si kama dambeys ah dembi la xiriira aamin darro iyo khiyaano uu ku muteeysanayo ka reebid shaqo guud;
   c) Qof haysta shahaado jaamacadeed kuna takhasusay cilmiga degaanka, isbeddelka cimilada, shuruucda deegaanka, ugu yaraanna toban sano (10) oo khibrad ah u leh hawlaha deegaanka, shuruucda iyo siyaasadaha deegaanka, isbeddelka cimilada iyo arrimaha la xiriira;
   d) Qof leh aqoon dheeraad ah oo la xiriirta maamulka deegaanka si uu u noqdo qof u qalma Maareeyaha Guud ee Hay'adda Qaran ee Maareynta Deegaanka;
3. Wasiirka ayaa go'aaminaya xaaladaha, shuruudaha ku xeeran iyo gunnooyinka uu qaadanayo Maareeyaha Guud si waafaqsan xeerka Shaqaalaha Rayidka Soomaaliyeed.
4. Maareeyaha Guud waxaa uu xafiiska Hay'adda haynayaa muddo shan (5) sano ah waxaana loo magcaaabi karaa xilkaas hal mar oo kale marka muddadiisu dhammaato.
5. Maareeyaha Guud inta aysan dhammaan muddada xil-hayntiisa waxa uu ku waayi karaa xilka Xafiiska;
   a) Xil-ka-qaadista loo maray habkii loo soo magacaabay.
   b) Muddo saddex bilood gudahood ah qoraal is-casilaad in uu u soo gudbiyo Wasiirka;
6. Magacaabista, muddo xilleedka, xil-ka qaadista Maareeye Ku-xigeenka Hay'adda waxaa sidoo kale loo marayaa nidaamka loo maray magaacaabista Maareeyaha sida ku xusan qodobkan.

## Qodoka 18aad
## Shaqooyinka Maareeyaha Guud ee Hay'adda

1. Maareeyaha Guud ee Hay'adda waa:
   a) Maamulaha guud ee Hay'ada Qaran ee Maareynta Deegaanka;
   b) Mas'uulka fulinta hawlaha Hay'adda si waafaqsan Sharciga.
2. Maareeyaha Guud ee Hay'adda waa in uu:
   a) Siiyaa Wasiirka warbixino, iyo talo xirfadaysan oo ku saabsan arrimaha la xiriira Deegaanka;
   b) j) Gutaa awoodaha iyo xilalka Hay'adda ee Qodobada Sharcigan lagu caddeeyey;
   c) Abaabulo Shaqaaleysiinta Shaqaalaha Hay'adda, una maamulo shaqaalaha Hay'adda sida uu qabo Sharciga Shaqaalaha Rayidka Soomaaliyeed;
   d) Horseedo abuuritaanka hawl-karnimo iyo anshaxa shaqaalaha Hay'adda dhexdooda isaga oo adeegsanaya tababarro xirfadeed;
   e) Diyaariyo isla markaana uu Guddiga Sare u gudbiyo qorshe-hawleedka, miisaaniyadda iyo warbixinta hawlaha Hay'adda
   f) Kharashka baxaya u adeegsado waafaqsan shuruucda maaliyadda guud ee dawladda;
   g) Wakiil ka noqdo Hay'adda xiriirka ay la yeelanayso dhammaan hay'adaha kale.
3. Maareeye Ku-xigeenku waxa uu caawinayaa Maareeyaha Guud, Sidoo kale waxa uu metelayaa Maareeyaha Guud marka uu maqan yahay, iyo waxii uu u idmado Marreyaha Guud ee hay'adda.

## Qodobka 19aad
## Dhaqaalaha iyo Xisaabaadka Hay'ada

1. Hay'addu waxay lahaanaysaa miisaaniyad-sanadeed si gaar ah loogu qoondeeyo oo isugu jira mushaaraadka shaqaalaha iyo hawl-socodsiinta;
2. Maaliyadda Hay'adda waxaa loo maareynayaa hab waafaqsan sharciyada maaliyadda guud ee dawladda.

## Qodobka 20aad
## Shaqaalaha Hay'ada

1. Hay'addu waxay yeelan doontaa shaqaale si ay u fuliso hawlaheeda iyo waajibaadkeeda shaqo;
2. Shaqaaleynta iyo maamulidda shaqaalaha joogtada ah iyo kuwa aan joogtada ahayn ee Hay`adda waxay ku jaan go'naanayaan si waafaqsan Sharciga Shaqaalaha Rayadka ah ee Dawladda.

**Qodobka 21aad**
**Soo-saarid Xeer-nidaamiye**

1. Sharcigani wuxuu yeelanayaa xeer nidaamiyeyaal iyo jadwallo fududaynayaa hirgelinta Sharcigan.
2. Wasiirka, isagoo la tashanaya Hay'adda, wuxuu soo saari karaa xeer-nidaamiyeyaal fududaynaya fulinta iyo hirgelinta sharcigan.

**Qodobka 22aad**
**Baabi'in**

Sharcigani wuxuu baabi'inayaa dhammaan shuruucda ka hor-imaanaysa sharcigan ama aan la socon karin.

**Qodobka 23aad**
**Dhaqan-gal**

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu Baarlamaanka Federalka ansixiyo, uuna saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saaraya Faafinta Rasmiga ee Dawladda.